Qoraalka Af-Soomaaliga: Dib-u-eegis

Afeef

Inkastoo aanan ahayn qof ku xeeldheer cilmi-afeedka afkeenna hooyo, haddana waxaan dareemayaa inuusan jirin qoraal midaysan oo aynu adeegsanno. Baraha internet-ka, buugaagta, iyo farriimaha la'isweydaarsadaba waxaad ku arkaysaa qoraal iskhilaafan oo aan isku dhan u socon. Waxaan soo bandhigayaa fikirkayga ku aaddan kala-duwanaanshaha qoraalka afkeenna. Waxaana laga yaabaa inaan aniguba ku dhaco shabaagta qoraal-habowga ee aan kaga hadlayo qoraalkaygan kooban.

Hordhac

Qoraalkan kooban waxaan kaga faalloon doonaa dayaca iyo dayac-tir la'aanta soo food-saartay qoraalka afka Soomaaliga. Ugu horrayn, jiritaanka luuqaduhu waa mucjiso Ilaahay sida Quraanka ku xusan[1]. Sidaynu ogsoonnahay, luuqaddu waxay fududeysaa xiriirka bulshada. Bulshadu waxay ku xiriirtaa, kuna wada-socotaa, qoraal ama qowl (hadal). In la dayaco ama la daryeeli waayo middood (qoraalka ama qowlka) waxay sababtaa dib-u-dhaca bulshadaas. waxaana yaraada, amaba xumaada, xiriirkeeda cilmiyeed. Taasina waxay horseeddaa in jiilasha soo socda loo gudbin waayo aqoon tayo iyo xikmadba leh.

Ka hor intaan la qorin Af-Soomaaliga, xiriirka Soomaalidu wuxuu ku koobnaa "hadal" la'isu tabiyo. Taasina waxay keentay in ay lumaan qaar badan oo ka mid ah gabayada iyo hadal-murtiyeedka Soomaalida. Inkastoo intii ka hartay hadal-murtiyeedyadaas maqal ahaan loo duubay, qaarna la qoray, haddana dheehashada macnahoodu waa sii gabaabsi sababa badan oo jira awgood, balse aan qormadan kooban lagu faahfaahin Karin.

Faahfaahinta iyo falanqaynta sababaha dib u dhaca Af-Soomaaliga waa mid laga sugayo dadka ku xeeldheer cilmi-afeedka. Aalaaba waxaa Af-Soomaaliga laga eegaa, oo wax laga qoraa, dhanka suugaanta iyo hal-abuurka, hayeeshee, waxaa baylah la dhigay qoraalkiisa.

[1] Quraanka kariimka. Juska 21. Suuradda Al-Ruum: Aayadda 22.

Ka-warqabid la'aanta hannaan-socodka qorista afka Soomaliga waxay halis ku tahay bahda aqoonyannada Soomaaliyeed. Qoraal-habowga afkeenna hooyo wuxuu xannibayaa in aynu is dhaafsanno aqoonta aynu soo barannay oo la rabo in loo gudbiyo bulshada Soomaaliyeed. Sidaan kor ku xusay, qoraalku wuxuu qayb-libaax ka qaataa gudbinta aqoonta. Haddaba qoraal qalloocan oo si feejignaan leh aan loo qorin wuxuuu gaarsiiyaa akhristaha farriin khaldan—waaba haddii la dhadhansado macnihiisee!

Waxaa muhiim ah in laga fekero, lagana baaraan-dego, jiilasha soo socda iyo waxay naga dhaxli doonaan. Jiilashaas waa inaan ban cidlo ah la dhigin. Waxay naga dhaxlayaan waa aqoonteenna oo qoran. Hubaal waxaa ah in qoraalku yahay qaabka keliya ee ugu da'da weyn ee bini'aadanku, ilaa manta, ku wada xiriiro. Haddaba maanay nala gudboonayn in aynu qoraalkeenna ugu gudbinno tafiirteenna sida ugu habboon oo ugu faseexsan?

Waxaan u qoray qormadan kooban inaan daan-daansado, baraarujiyana, fikirka aqoonyahannada Soomaaliyeed meel walboo ay joogaan; Daan-daansi aan uga gol-leeyahay inay Soomaalidu dib u jallecaan geeddi-socodka qoraalka afkeenna hooyo.

Ahamiyadda qoraalka Af-Soomaaliga:

Maahmaah baa ahayd: *waari mayside, war ha kaa haro.* Aqoonta iyo waaya-aragnimada Soomalida maanta waxay ku waari kartaa qoraal. Qoraal weeleeya xikmadaha is daba yaal ee kaydka u ah jiilasha is daba taxan. Dhaqankaaga, taariikhdaada, iyo soo-jireenkaagaba waxaa laga fahmaa qoraallada waara ee kuu soo tabinaya waayihii tagay. Qoraal qalloocani wuxuu sababaa taariikh lunta; taariikhdaas oo dhaxal-gal u noqon lahayd jiilasha soo kacaya. Waxayna muhiimaddu tahay in loo qoro jiilashaas khaladaadka maanta dhacaya si ay berri uga dhawrsadaan. Haddaynaan innagu si *sax* ah u qoranin maanta, dad kalaa inoo qori oo fikir khaldan naga faafin doona! Shaki kuma jiro in Soomaalidu buugaag ay qoraan, laakiin su'aashu waxay tahay: *sidee loo qoraa buugaagtaas?*

Kala-duwanaanshaha qoraalka Soomaalida

Buugaag badan ayaa laga qoray taariikhda, sooyaalka, suugaanta, iyo dhaqanka Soomaalida. Laakiin waxaa fajiciso ah kala-duwanaanshaha qaab-qoraaleedka Af-Soomaaliga ee ku qoran buugaagtaas!

In kastoo luuqaddu isku mid tahay, haddana, waxaa kala duwan sida loo qoray erayada la adeegsaday. Mar haddii luuqad qura (Af-Soomaali) wax lagu wada qoray, waa in erayaduna isku qoraal noqdaan.

Waxaad ku arkaysa Barta Wikipedia[2] in Af-Soomaali khaldan lagu qoray; Tani khatarteeday wadataa. *"Hal-abuur"* see loo qoraa? Waa marka *koowaade*, bal u fiirso sawirka hoos ku yaal. *Hal-abuur* oo laba qoraal la siiyay: *"Hal Abuur"* iyo *"Halabuur"*.

Hal Abuur

Halabuur (Af-Ingiriis: *composer*, Af-Carabi: ملحن) waa qof haybad u leh diyaarinta ereyada ay ka samaysan tahay heesi. Sida caadiga ah qofka halabuurka lehi wuxuu awood iyo aqoon uleeyahay inuu sameeyo tix, dhowr bayd gabay ama geeraar ah, kuwaasi oo marka laxan la saaro laga dhigo hees.

Qofka halabuurka ahi wuxuu samayn karaa gabay, geeraar, buraanbur, majaajilo iyo wixii la mid ah. Sidoo kale, halabuurku waa nooc ka mid ah abwaanimada.

Qoraalka gudaha oo kooban [qari]

1 Tusaale
2 Qoraalo La Xidhiidha
3 Linkiyo Banaanka
4 Tixraac

Laga soo xigtay: www.wikipedia.org

Waxaa xusid mudan in labada qoraal ee kala duwani isku xigaan. Taasoo macnaheedu yahay in qofka qoray uusan dhab ugu fiirsan kan hore markuu kan xiga qorayay.

[2] www.wikipedia.org

Waa marka *labaade,* qofka qoray—hadduu Soomaali yahay—inuu u fiirsaday ahayd qoraalka afkiisa hooyo maadaama uu u gudbinayo caalamka, illeen afkeenna hooyo innagaa matalnee.

Haddaba, labada qoraali (*Hal Abuur* iyo *Halabuur*) sax ma wada noqon karaan! Waxaa kaloo is-weydiin mudan: sida loo qeexay labada eray ma sax baa? Ma si sax ah baa loo turjumay (Carabi iyo Ingiriis)? Haddaynaan ilaashan afkeenna hooyo yaa inoo ilaalin? Ma ummado kalaan ka sugnaa inay noo ilaashaan? Mise waa *cidna uma maqna ceelna uma qodna*?

Tusaale kalena aan ku daree, erayga "dowlad-goboleed" (oo ah eray aynu aad u isticmaalno) waxaad arkaysa isagoo loo dhigay sidan: *Dowlad goboleed*; Mar kalena loo rogay: *dowlad-goboleed*; mar saddexaadna loo dhigay: *d**a**wlad-goboleed.*

Haddii aan sii caddeeyo: marna waa la kala dhambalay labdii eray, mar kalena waa la isku xiray, mar saddexaadna waxaa xarafkii "*o*" lagu bedelay "*a*".

Saddexdaas qoraal ee uu qaatay *"dowlad-goboleed"*, maxaa loo sababeeyay?

Waxaynu kala horarsanno hal-abuurnimo iyo dowlad-goboleednimo, ma waxaynu maraynaa inaan isku khilaafno qoraalkoodii?!

[qa

Dawlad goboleed

Dawlad-goboleed (Af-Ingiriis: Administrative regions; Af-Carabi: منطقة) waa gobollo dal ka tirsan isla markaana leh xukkun hoosaad kuna dhisan qaabka ah in ay degmooyinka ka kala yimaadaan ergooyin ka kooban siyaasiin iyo odayaal dhaqameedyo ayaa waxay magacaabayaan ergo 100 qof ah waxay dooranayaan 4 qof oo ka socda degmada una gudbaya heer gobol.

Qoraalka gudaha oo kooban [qari]

1 Faallo
2 Sidoo kale fiiri
3 Tixraac
4 Xigasho

Laga soo xigtay: www.wikipedia.org

Inuu eray qaato laba qoraal waa in la sababeeyaa. Tusaale ahaan Af-ingiriiska (English), oo dalal badan lagaga hadlo, waxaa ku jira erayo laba qoraal yeesha. Waxaa ka mid ah erayadaas: *program/programme, center/centre, honor/honour*. Macnaha erayadaasi muhiim ma ahan haddeer. Waxaa muhiim ah in aan

sababayno kala-duwanaanshaha qoraalkooda. Sababtuna waxay tahay erayada hore waa qaab-qoraaleedka dalka Ingiriiska, halka kuwa kalena yihiin kan Maraynkanka.

Waxaa la oran karaa, in kastoo hal luuqad ay wadaagaan, waa labo dal oo kala fog degaan ahaan; waana laba dal oo ku kala duwan dhaqan ahaan. Iyadoo ay sidaas tahay, haddana, waxaa mamnuuc ah in la isla isticmaalo labada qoraal ee kala geddisan—waa kan dalka Ingiriiska iyo Maraykankee. Haddaad wax ku qoraysid Af-Ingiriisi adoo adeegsanaya hab-qoraaleedka Maraykanka, waa inaadan la isticmaalin kii dalka Ingiriiska.

Erayada Af-Soomaaliga ah ee lagu kala duwanyahay *mid* iyo *laba* ma ahan. Erayadaas waxaad ku arkaysaa buugaagta iyo warbaahinta, intaan loo imaan Baraha Bulshada. Waxaa kaloo la-yaab leh, in qoraagu qudhiisu isku khilaafo qoraalka erayga—marba si u rogo, oo hadba doc ka maro!

Qaar ka mid ah erayada qoraalka badan aynu siinnay[3]

Qoraalka koowaad	Qoraalka labaad	Qoraalka saddexaad
Dowlad-goboleed, Dawlad-goboleed	Dowlad goboleed	Dawlad goboleed
Maskax-maal	Maskax maal	Maskaxmaal
Muruq-maal	Muruq maal	Muruqmaal
Maahmaah	Maah maah	Maah-maah
Af-Soomaali	Af Soomaali	Afsoomaali
Dhaqan-celis	Dhaqan celis	
Dal-tabyo	Dal tabyo	
Xabaal-wadareed	Xabaal wadareed	xabaalwadareed
War-murtiyeed	War murtiyeed	
Dhiiri-gelin	Dhiiri gelin	Dhiirigelin
Gaashaandhigga	Gaashaandhiga	

[3] Erayadaan dhammaan Bogagga Internet-ka ee Af-Soomaaliga ku qoran ayaan ka soo xigtay; ma ahan kuwo aan anigu qoraalkooda allifay!

Is-casilaad	Is casilaad	Iscasilaad
Dulqaad	Dul qaad	
Saxansaxo	Saxan saxo	
Fadhi-ku-diri	Fadhi ku dirir	
Beri subax	**Berri** subax	
Baroor-diiq	Baroor diiq	Baroordiiq
U gaar ah	**Ugaar** ah	
U sheegay	**u**sheegay	
Wada-tashi	Wadatashi	Wada tashi
Sawir-qaade	Sawirqaade	Sawir qaade
Oday-dhaqmeed	Oday dhaqameed	
Dal-ku-gal	Dal ku gal	
Lafa-gur	Lafa gur	
Dhaqan-gal	Dhaqan gal	
Xeer-hoosaad	Xeer hoosaad	
Aqal-Soomaali	Aqal soomaali	
Laab-la-kac	Laab la kac	Laablakac/laab-lakac
Qurba-joog	Qurba joog	
Waayo-arag	Waayo arag	
Kadib	Ka dib	
Kamid ah	**Ka mid** ah	
Daah-fur	Daah fur	Daahfur
Roob-la-dhac	Roob la dhac	Roobla dhac/roobladhac
Daba-qabasho	Dabaqabasho	Daba qabasho
Jaha-wareer, jaah-wareer, jaaha-wareer	Jahawareer, jahwareer, jaahwareer, jaahawareer	Jaha wareer/jaaha wareer

Ogoow oo igama ahan inaan soo koobo erayada sida kala duwan loo dhigay. Bal adba booqo Baraha warbaahinta Soomaalida oo indhahaaga kaga bog.

Is-daba-dhigista erayada Af-Soomaaliga way ku kala duwanyihiin Soomaalidu. Tusaale ahaan, qof baa wuxuu qorayaa:

"u gaadha waxaa la gu ka la soocaa…"

"waa in uu isa gu is xil qaamaa."

Qof kalena wuxuu u qorayaa sidan:

"ugaadha waxaa lagu kala soocaa..."

"waa inuu isagu is xilqaamaa."

Marka su'aashu waxay tahay: *maxaa sababay*?

Su'aashaas laba jawaaab mid ayay yeelan kartaa:

1. In ilaha laga soo xigto qoraalka Af-Soomaaliga aysan iyagu midaysnayn oo ay ardayda (Soomaalida) siinayaan qoraal kala duwan. Ma u malaynayo in arrinkaasi yahay mid kas loo sameeyay, laakiin waa mid uu keenay ka-fiirsasho la'aan marka la qorayo bugaagta Af-Soomaaliga laga barto. Taasina waxay salka ku haysaa burburka aynu ku jirno iyadoo faraha laga qaaday dib-u-eegista qoraalka Af-Soomaaliga. Ama,

2. In ay san jirin ilo dhab u darsaya qoraalka saxda ah ee Af-Soomaliga, sidaas daraadeedna ay Soomaalidu hadba geed la fuulaan oo qofba say la noqoto uu u xarriiqo afkeennii—sida erayada aan kor ku tusaaleeyay.

Maahmaah baa waxay ahayd: *hadal waa mergi hadba meel u jiidma;* Haddana ma qoraalkii baa *mergi* isaguna noqday oo waa *la jiifiyaana bannaan, la joojiyaana bannaan?*

Daryeelidda Af-Soomaaliga horaa looga hadlay. Qoraallo badan oo dhinacyo kala duwan taabanayana ayaa laga qoray. Tusaale ahaan, wuxuu abwaan Axmed Faarax Cali "Idaajaa" wax ka qoray Af-Soomaaliga iyo warbaaahinta; waxaa si tafatiran loo soo bandhigay naxwaha Af-Soomaaliga; waxaa si kooban looga hadlay fanka qoraalka; waxaa faah-faahin laga baxshay xeerka astaamaynta qoraalka; waxaaba laga digay dabar-go'a Af-Soomaaliga! Si kastooy ahaataba, waxay u muuqataa inaynu qoraalladaas ku waantoobin. Waxaad mooddaa in aynaan dareensanayn waxyeellooyinka lagala kulmi karo daryeel la'aanta afkeenna hooyo.

Waxyeellooyinka qoraal-xumada Af-Soomaaliga:

Isbedelka macnaha (ujeeddada qoraaga)

Haduusan qoraagu u fiirsan qoraalka erayada, waxaa fudud in khalad loo fahmo ujeeddadiisa. Hadduu qofba suu rabo wax u xarriiqo, qofba suu rabuu wax u fahmayaa; waxaan ula jeedaa: qoraal aan midaysnayni, fahan aan midaysnayn buu keenaa!

Akhristuhu ma ahan inuu fasirto hadalka qoraaga, ee waa qoraagu inuu caddeeyo ujeedkiisa. Ma ahan akhristuhu inuu u dulqaato qoraalka khaldan ee Af-Soomaliga; Kaasi waa dulqaad aan meeshiisi ool. U hadal saad rabtid, balse sida saxda ah wax u qor. Ma ahan akhristuhu inuu la kacaa-kufo fahanka qoraalkaaga; Mana ahan akhristaha in la hor dhigo qoraal khaldan, lagana sugaa fahan saxsan.

Da'yarta Soomaalida dibedda

Lama baro da'yarta Soomaalida dibedda, badankood, sida loo qoro amaba loo akhriyo Af-Soomaaliga. Haddii la barana waa iyagoo guriga lagu baray, kumase filna. In kastoo qaar ka mid ah jaamacadaha dalka Maraykanka ay billaabeen barista Af-Soomaaliga, haddana hadday sugaan da'yartu illaa heer jamacadeed say u bartaan afkooda hooyo waxay uun u baran sidii qof ajnabi ah, oo aysan luuqaddu—qoraal iyo akhristoonna—u billownayn.

Haddaba, da'yartaasi markay arkaan eray laba qoraal leh, waxay u fahmayaan in laba si loola kala jeedo maadaama laba qoraal la siiyay. Haddaan si kale u dhigo, hal eray oo laba qaab loo qoray ayay laba macne ka sugayaan; Macnaha qura ee erayga la siiyayna hal qoraal bay u tiirin doonaan, qoraalka kale ee khaldanna way iska sidanayaan illaa ay meel khaldan madaxa u geliyaan oo hadhow aan laga fujin karin.

Waan ognahay oo waxaynu, aalaaba, ka cabannaa sida day'arteenna dibed-ku-barbaarka ahi ay ugu liitaan ku-hadalka Af-Soomaaliga, maxay kuula muuqataa, marka, haddaynu qoraal khaldanna ugu darno?! Maxay kuula muuqataa haddaynu si khaldan u qornay qoraalladii ay wax ka baran lahaayeen? Maanay ahayn dhega-la'aan iyo indho-la'aan?

Taasina kuma ekaan doonto da'yarteenna dibedda ku barbaartay, ee waxay caqabad ku noqon doontaa qofka aan Soomaaliga ahayn ee doonaya inuu barto afkeenna hooyo.

Maxaa sababay kala-duwanaanshaha qoraalka Af-Soomaaliga?

Kala-duwanaanshaha qoraaleed iyo qoraal-xumada ina haysata, wada aragnaye, maxaa sababay? yaynu eersannaa?

- Ma *hab-dhiska waxbarasho* ee dalka ayaa ka gaabiyay hagaajinta qoraalka afkeenna hooyo?
- Mise waxaa eedda dusha laga saarayaa *qoraaga* aan xilka iska saarin inuu saxo qorista afkiisa hooyo?
- Ma waxaynu eersannaa kala-duwanaanshaha *lahjadaha* Soomaalida?
- Mise eedda waxaa iska leh (sidaynu aalaaba niraah) *beesha caalamka* oo Soomaalida aan barin sida Af-Soomaaliga loo qoro[4]
- Mise, eedi ma jirtee, waa *hodannimada* afka Soomaaliga—suu afkeennu u murti iyo erayo badan yahay, buu u qoraallo badan yahay?
- Mise intaasi inaguma filnee, *wax kalaannu* eersannaa?

Muhiimaddu ma ahan in aynu eedda cid gurada[5] u saarno, balse waa in aynu dhibta garanno oo dhayno boogta ina bugta. Waa in aynu *xal* u raadinnaa qoraal-habowga ina haysta.

Haddaba, maxaa xal ah?

Kor-u-qaadista, tayaynta, iyo midaynta qoraalka afkeenna hooyo waa waajib ina wada saaran. Xalkuna wuxuu ku jiraa innagoo garawsanna halista uu ku jiro afkennu.

Luuqadi kuma waarto ku-hadal oo kaliya, balse qoraal. Muddo (~~ka dib~~?) kadib, Ku-hadalka luuqaddu wuu isbedelaa iyadoo waliba ay yaraadaan adeegsiga erayo badan oo luuqaddaas ku jiray; bal isu eeg gabayadii qarnigii tagay iyo Af-Soomaaliga

[4]Tani jawaabba iska daaye, su'aalba uma qalanto!

[5] Gurada = dusha

maanta, isu eeg Af-Soomaliga miyiga iyo magaalada, isu eeg Af-Soomaliga da'yarta iyo duqayda.

Isbedelka ku-hadalka luuqaddu waa mid ku xiran wakhtiga oo wax-ka-qabasho maleh! Balse waa in, haddaannu Soomaali nahay, aan iska ilaalino in isbedelkaasi naga asiibo dhinac walba (ku-hadal iyo qoraal ahaan).

Haddaba, yaa laga rabaa in ay dayac-tir iyo daryeel la daba joogaan *qoraalka* Af-Soomaaliga?

Wanaajinta qoraalka afkeenna hooyo waa waajib qaran. Qof kasta oo Soomaali ahi waa inuu xil iska saaraa hagaajinta qoraalka Af-Soomaaliga. Dhayalsashada qoraal-xumada maanta ina haysata waxay u horseedi doontaa dhaawac-afeed aan laga soo kabsan karin.

Dabaqabashada qoraalka Af-Soomaaliga Waxaa gacan buuxda ka geysan kara:

1. ***Dugsiyada (Iskoollada):*** qoraalka, akhriska, iyo naxwaha Af-Soomaaliga waa in la baraa ardayda dugsiyada hoose, dhexe, iyo sareba. In kastoo ardaydu ay qaataan maaddo (xiisad) Af-Soomaali loo yaqaan, haddana ma wada daboosho baahida afeed ee ardayda.
   Buugaagta Af-Soomaaliga laga dhigo ee dugsiyada, inta aan ogahay, waxay daboolaan akhriska, suugaanta, iyo sooyaalka; waxaana lagusoo gunaanadaa eray-bixin iyo laylisyo. Iyadoo taasi ay tahay mid muhiim u ah ardayga si uu u ogaado dhaqankiisa iyo soo-jireenkiisaba, haddana waxaan ardayga marnaba lagu baraarujin inuu dhab u dhugto bal sida loo qoro afkiisa! Marnaba ardayga lama siiyo cashar ama cutub ka hadlaya qorista Af-Soomaaliga (marka laga reebo barista Alifbeetada).
   Waxaan hadalkaas ula jeedaa, in kastoo ardaygu uu akhrinayo Af-Soomaali qoran, haddana marnaba uma fiirsado sida uu u qoranayahay qoraalka uu akhrinayo ee wuxuu xoogga saaraa, oo kaliya, qoraalku wuxuu ku saabsanyahay.
   Marka aad baranaysid luuqad kugu cusub waxaad had-iyo-jeer xoogga saarta macnaha erayada iyo dhigaalkoodaba; eray aad macnihiisa taqaanid haddana aadan qori karin qiimo weyn kuma fadhiyo.
   Haddaba inkastoo aan u dhalannay luuqadda Soomaaliga ku-hadal ahaan, oo aynu ka barannay guriga iyo bulshadaba innagoon dadaal dheer la iman, haddana qoraal ahaan looma sinna. Qofkasta oo Soomaali ahi ma qori karo

Af-Soomaaliga haddii aan la barin sida loo qoro. Sidaas daraadeed waxaa la oran karaa in ku-hadalka luuqaddu ay ka fududdahay in la qoro marka uu qofku kusoo barbaaro bulsho ku hadasha luuqaddaas; laakiin qoraalka waa in dhab loo bartaa, loo fiirsadaa, oo dadaal dheer lala yimaadaa.
Haddaba ardayga Soomaaliga ah ee dugsiyada dhigta wuu ku hadli karaa Af-Soomaali, laakiin ma qori karaa? Waa may. Marka dugsigu ma ahan inuu xoogga saaro gabayada iyo sheekooyinka oo kaliya, ee waa inuu xooggaas mid lamid ah, amaba ka badan, saaraa qoraalka Af-Soomaaliga.

2. **Ardayda jaamacadaha:** ardayda jaamacaduhu waa inay kaalintooda ka qaataan hagaajinta qoraalka afkeenna hooyo. Waxaad mooddaa ardaygu hadduu billaabo jaamacadda inuu doc iska dhigo, dibna uusan u eegin, qoraalka afkiisa hooyo. Wuxuu ardaygu qoraalka Af-Soomaaliga la kulmaa markuu akhrinayo buug (sheeko, siyaasad, ama qabyaalad ku saabsan) ama daalacanayo wararka. Badi ardayda jaamacaduhu iskuma dayaan inay dhuuxaan hab-qoraaleedka luuqaddeenna. Waxaana hubaal ah in ardaygu uu u baahan doono afkiisa hooyo, qoraal iyo ku-hadalba, si uu bulshadiisa ugu gudbiyo cilmiga uu baranayo.
Ardaydu waxay wax ku bartaan afaf kale sida Ingiriis iyo Carabi, haddaba waxaa la oran karaa kuwaasi waa afafka aynu cilmiga kusoo xambaarannay, laakiin si rarka loo rogo (cilmiga loo gudbiyo) waa in Af-Soomaali saxsan la isticmaalaa (qoraal iyo ku-hadal).
In kastoo Soomaalida waxbaratay ay soo badanayaan, haddana dadkeennu badi heer jaamacad ma gaaraan. Ardayga jaamacaddu waa inuu dareemaa qiimaha uu qaranka Soomaaliya ugu fadhiyo—waa inuu dareemaa in la wada dhowrayo. Ma ahan inuu ardaygu ka soo qalinjabiyo jaamacadda isagoo af qalaad xambaarsan oo ka faanaya amaba liidaya qoraalka afkiisa. Ogoow, marka laga tago bahda waxbarashada, dadweynuhu waxay kugu fahmayaan waa Af-Soomaali.
Maadaama wax loo soo baranayo qaranka Soomaaliyeed, waa inaan qiimaha cilmiga aan soo barannay raacinnaa qadarinta afka dadweynaha aan wax u soo barannay. Af-Ingiriis baan aqaannaa iyo Af-Carabi baan wax ku qoraa, annagoo Af-Soomaaliga qoraalkiisa ku liidanna, uma ciidaminayso jiritaanka, midaynta, iyo daryeelidda Af-Soomaaliga.

3. **Warbaahinta qoran:** bahda warbaahintu waa, baa la oran karaa, kuwa ugu qoraalka badan dunida—qorraxdii soo baxdaa iyo tii dhacdaaba boqolaal qoraal bay is daba dhigaan. Qoraalkaas badani wuxuu caddaynayaa in akhristayaal badani ay ku taxanyihiin. Qoraalladaasi waxay saameeyaan, farriinna u gudbiyaan, akhristaha.

   Haddaba, warbaahinta waxaan ka filannaa inay noo soo gudbiso *war* sugan oo xaqiiq ku salaysan. Sidaasoo kale warbaahinta qorani waa inay adeegsataa *qoraal* (Af-Soomaali) sugan oo aan isagu iska hor imaanayn.
   Markasta oo aad booqaatid bogagga Internet-ka wararka laga daalacdo, waxaad la kulmaysaa qoraal Af-Soomaali ah oo is khilaafaya. Waa arrin anigu in badan aan la yaabay! Mar haddii shaqadaadu tahay qoraal, waa inaad wanaajisaa. Waa inaad wax u qortaa qaab midaysan (saad shalay u qortay, maantana u qor). Maxaa sababay inaad hadba si wax u qortid?
   Bahda warbaahintu si gaar ah ayuu u taabanayaa adeegsiga Af-Soomaaligu. Maadaama ay Af-Soomaali wararka ku tabiyaan, kuna qoraan, waxay si lixaad leh ugu adeegi karaan tayaynta afkeenna.
   Haddaba, waxaa ku habboon warbaahinta Soomaalida inay u fiirsadaan qoraalladooda siday ugu fiirsadaan sugnaanta wararka ay tabinayaan.

4. **Cilmi-afeedyahannada:** inkastoo cilmi-afeedka Soomaaliga aad wax looga qoray, loona falanqeeyay, haddana waxaan si qoto-dheer wax looga qorin qaab-qoraaleedkiisa. Waxaan runtii aad u jeclaan lahaa in cilmi-afeedadeennu ay ka falloodaan qoraalka qumman ee Af-Soomaaliga si loo helo qoraal midaysan.
   Soomaalida ku xeeldheer afka Soomaaliga waa fara-ku-tiris, waana gabaabsi; ardayda Soomalida ee soo barata cilmi-afeedkana aad bay tiradoodu u yartahay, taasina waxay keenaysaa in la waayo cid badasha cilmi-afeedyahannada maanta. Waxaa cilmi-afeedka luuqaddeenna gacan weyn ka geystay, aadna wax uga qoray, aqoonyahanno ajnabi ah, welina ma arag dhalinyaro ku howlan inay lafa-guraan cilmi-afeedka Soomaaliga.

5. **Qoraaga**: Qoraagu wuxuu ka tagaa qoraal dhaxal-gal noqda, waara, oo jiilashu isu dhiibaan (waxayse ku xirantahay hadba mawduuca wax laga

qorayo). Qoraagu waa inuu ka fikiraa dhigaalka qumman ee erayada uu adeegsanayo si uu uga ilaaliyo afkiisa hooyo qoraalka qalloocan.
Marka wax lagu qorayo Af-Ingiriisiga iyadoo la adeegsanayo aaladda casriga ah ee "Kumbuyuurtarka", waxaa erayga sida khaldan loo qoray hoos ka marta calaamad guduudan oo ka dhigan in eraygaasi u baahanyahay sixitaan. Inkastoo afkeennu weli uusan ku biirin afafka Kumbuyuutarku sixi karo, haddana qoraagu waa inuu isha la raacaa oo uu ka fiirsadaa qoraalka erayada uu adeegsanayo.
Isagoo qoraagu uu ku mahadsanayahay inuu bulshada usoo gudbiyo qoraal nafci leh, haddana ma ahan inuu wax u qoro *jaantaa rogan*. Waxaad mooddaa inaan badankeennu barannay higgaadda iyo Alifbeetada oo aanan u joojin qaab-qoraaleedka afka, oo marba hadday erayadu meesha ka muuqdaan aysan israaciddoodu iyo kala goyntoodu wax weyn ku fadhin—taasina waxay ku caddahay sida aynu badankeennu wax u qorno oo aan weli midaysanayn.

Gunaanad

Afkeennu waa hodan oo waynu wada ogsoonnahay, laakiin waa in aynaan isaga ciyaarin qoraalkiisa oo ninba dhan la aadin. Soomaalidu daafaha dunida ayay ku faaftay, waxa aynu isku fahannaana waa Af-Soomaali (qoraal iyo ku-hadal); da'yar badan baa dibedaha ku sugan oo u baahan inay dhaqankooda iyo afkooda bartaan, qoraal aan midaysanyna wuxuu ku noqonayaa jahawareer (~~jaha-wareer~~?).

In kastoo Af-Soomaaligu yahay luuqad fac weyn, haddana taariikhdiisa qoraali ma fogayn. Kala fogaanshaha qoraalka Soomalida waa in si gaar ah loo darsaa oo la mideeyaa.

Haddii aynu niraah Af-Soomaaligu waa—qoraal ahaan—mid curdin ah, waa xilligii la barbaarin lahaa; haddiise aynu niraah waa Af sii dabar-go'aya, waa xilligii la daba qaban lahaa.

Haddii la miisaamay maansada Soomaalida, waa inaynu miisaannaa, sidoo kale, qoraalka Af-Soomaaliga.

Ugu danbayntiina waxaan oran lahaa: Qoraagu hadduu qoro waxaan qoraal istaahilin, una qoro si aan loo qorin, waa mugdi mugdi galay! Balse, waa su'aale, ma u qalmaa in loogu yeero *qoraa*?

Tixraac

Kitaabka Quraanka kariimka. Juska 21, *Suuradda Al-Ruum*: Aayadda 22.

Dawlad goboleed. (Oktoobar 11, 2016). *Wikipedia. Lasoo xigtay* Janaayo 7, 2018 https://so.wikipedia.org/w/index.php?title=Dawlad_goboleed&oldid=162337.

Hal Abuur. (Oktoobar 22, 2016). *Wikipedia.* Lasoo xigtay Janaayo 7, 2018 https://so.wikipedia.org/w/index.php?title=Hal_Abuur&oldid=163235.

Axmed F. Cali "Idaajaa". (n.d.). *Af-Soomaaliga iyo Warfaafinta*. Lasoo xigtay Janaayo 6, 2018 http://dspace-roma3.caspur.it/bitstream/2307/2942/1/AFSoomaaliga%20&%20Warfaafinta%20Maanta%20_Idaajaa_.pdf

Mansuur, A. Puglielli, A. (1999). *Barashada Naxwaha Af-Soomaaliga: a Somali school grammar.* Haan Associates Publishing. London. http://dspace-roma3.caspur.it/bitstream/2307/2171/2/Barashada%20Naxwaha%20Af%20Soomaaliga%20-%20A%20Somali%20School%20Grammar.pdf

Cabdiraxmaan Xasan Nuur. (Agoosto 7, 2014) *Fanka Qoraalka*. http://kismaayonews.com/2014/08/07/fanka-qoraalka-wd-cabdiraxmaan-xasan-nuur/

Ibraahim-Hawd Yuusuf. (n.d.). *Xeerka astaamaynta qoraalka.* *http://somalilandtoday.com/xeerka-astaamaynta-qoraalka-wq-ibraahin-hawd-yuusuf/*

Cabdiraxmaan Maxamed Warsame (Guure). (Nofeembar 20, 2017). Afka hooyo hodansanaa hiiladiisuna habacsanaa. http://qaamuus.net/afka-hooyo-hodansanaa-hiiladiisuna-habacsanaa/

Mareykanka: Jaamacado Bilaabay Dhigista Af-Soomaaliga. (Maajo 1, 2017). *VOA Soomaali.* https://www.voasomali.com/a/3832567.html

Christopher *et al*. (2014). Reference and Pedagogical Resources for 'Standard' Somali. *Electronic Journal of Africana Bibliography*. 15(1). http://ir.uiowa.edu/ejab/vol15/iss1/1/

Axmed Haybe (Axmed Dawlo). (n.d.). *Taariikhda Qoraalka Far Soomaaliga*. http://www.doollo.com/mainpage/Axmed/dawlo.htm

Cali Ileeye. (n.d.). *Miisaanka Maansada Soomaaliyeed(MMS): Midayn iyo Midhiftir*. La soo xigtay Janaayo 6, 2018 https://caliileeye.files.wordpress.com/2014/03/miisaanka-maansada-1t.pdf

Cabdalla Cumar Mansuur. (Maarso 12, 2016). *Midaynta iyo hor umarinta Af-Soomaaliga*. La soo xigtay Febraayo 5, 2018 http://www.wardheernews.com/wp-content/uploads/2016/03/Mideynta-Af-Soomaaliga-WQ-Cabdalla-Mansuur.pdf